

Waxyaabaha Ay Tahay In Uu Qaban Karo

Ilmaha Maqalkiisu Wanaagsan Yahay:

Dhalashada ilaa Da'ada 3 Bilood Jirka

- Libiqsi ama booditaan markay dhacdo qaylo kusoo booda ah, dheer
- Aamusni ama dhoola cadayn marka lala hadlo
- Samayn dhawaqyada sida "ohh" iyo "ahh"

Da'ada 3 ilaa 6 Bilood Jirka

- Ku eegid indhaha dhawaqa
- Bilaw gunuunuc ("baba," "mama," "gaga")
- Iisticmaalka codad badan iyo dhawaqyo badan

Da'ada 6 ilaa 9 Bilood Jirka

- Madax u jeedin dhawaqa dheer
- Fahan kalmadaha "no-no" ama "bye-bye"
- Gunuunuc, tusaale ahaan "baba," "mama," "gaga"

Da'ada 9 ilaa 12 Bilood Jirka

- Ka daba dhihid kalmado iyo dhawaqyo aad ti-dhaahdo
- Dhihida saxda ah ee "mama" ama "dada"
- Jawaab celin ishaarada iyo muusiga ah
- Tilmaamid albaabta uu ugu jedel yahay ee ciyaarta marka la waydiyo.



Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid maqalka il-mahaaga ama waxyaabahan, kala sheekeyso dhakhtarka il-mahaaga



Wac 402-471-6770 ama khadka tooska ah : 1-888-545-0935
<http://dhhs.ne.gov/publichealth/EHDI>

Rev 12/2016

Yaa caawin kara hadii ilmahaagu dhagaha aanu waxba ka maqlaynín?

Early Development Network in Nebraska.

Kala xidhiidh lambarka khadkooda tooska ah **1-888-806-6287**.



Halkeed ka heli karaa xog dheeraad ah?

Waxaa laguu sameeyay balanta dhakh-tarka eebaaritaanka maqalka ilmahaaga ee soo socodata:

Magaca Ilmahaaga

Taariikhda iyo Wakhtiga

Goobta

Lambarka Taleefanka

Fadlan soo hadal haddii aad balanta badalayo



Mashruucan waxaa taakuleeya Health Resources and Services Administration (HRSA) ee Department of Health and Human Services (HSS) oo hoos timaada lambarka adduunka H61MC0065, Universal Newborn Hearing Screening, taas oo isugayn ah \$249,678. Majirto wax urur aan dawlil ahayn oo taakuleeya barmaamijkan. Xogtan ama macluumaadkan iyo qoraalkanii waa ka qoraaga waana in aan loo arag mid sharci ama weedha rasmi ah, sidoo kale maaha mid lagu daba galayo HRSA, HHS ama Dawlada U.S.

Ilmahaagu Waxa Uu U Baahan Yahay Baaritaan Maqalka Oo Kale



NEBRASKA

Good Life. Great Mission.

DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

Somali


Waa maxay Sababta uu Ilmahaygu Ugu Baahan Yahay Baaritaan Maqalka oo Kale?

Caruurta qaar waxay ugu baahan yihiin baaritaan maqalka oo kale sababta oo ah:

- ◊ Dareere dhagaha ah
- ◊ Cod ka jiray qolka baaritaanka
- ◊ Ilmuu wuu dhaqdhaqaaqayay intii baaritaanku socday
- ◊ Ilmuu si fiican waxba uma maqlayo

Badi caruurta u baahan baaritaanka kale ee maqalku caadí ayay u wax u maqlaan.

Qaar waxba si fiican uma maqlaan.



Waa maxay muhiimiyada in la sameeyo baaritaan labaad oo sida ugu dhakhsoha badan ah oo maqalka ahí?

- ◆ Baaritaanku waa sida kaliya ee lagu ogaan karo haddii aanu ilmuu si fiican waxba u maqlaynin.
- ◆ Markasta oo hore loo ogado maqalka xun, jidhka ayay u wanaagsan tahay.
- ◆ Maqalku waa u muhiim sheekada iyo waxbarashada.
- ◆ Hadii aanu ilmuu si fiican waxba u maqlaynin, caawimadu waa diyaar. Kali ma tihid.

Ogaanshaha mudada hore ee maqal xumado saamayn wayn ayay ku yeelan kartaa nolosha ilmahaaga.

Maxaa laga filan karaa booqashada dhakhtarka?

- ◆ Qof loo tabo baray ayaa baaritaan ku samayn doona ilmahaaga waxaanu kuu sheegi doonaa haddii baaritaan kale oo baahan yahay.
- ◆ Baaritaanku waa badbaado xanuna malaha.
- ◆ Caruur tiro yar ayaa u baahata baaritaan isku dhan oo maqalka ah, sidaasi darteed waxaa lagaa dalban karaa inaad ilmaha soo celiso.
- ◆ Haddii uu ilmahaagu u baahan yahay baaritaan dheeraad ah, u mari sida ugu dhaksaha badan.

Ilmaha sabiga ahí inta uu ka dugbo baaritaanka maqalka ah hadana wali masii ahaan karaa mid aan waxba maqal?

Haa, caruurta qaar si fiican ayay wax u maqlaan kaas oo ay baaritaanka kaga gudbaan, balse waxa ay maqalka waayaan mudo danbe sababta oo ah:

- ◊ Xanuunada qaar
 - ◊ Dwoooyinka qaar
 - ◊ Dhaawacyada qaar
- Dhago la'aan hidoo raac qoys ah
- ◆ U fiirso calaamadaha dhago la'aanta inta uu ilmuu korayo.
 - ◆ Liiska dhabarka ku qoran tilmaamo ahaan u isticmaal oo adeegso.
 - ◆ Hadii aad wax su'aalo ah ka qabto maqalka ilmahaaga kala sheekeyso dhakhtarka ilmahaaga.